# AASIYA – QAARADDA UGU DADKA BADAN ADDUUNKA

Asia waa qaaradda ugu wayn qaaradaha adduunka. Marka la isku geeyo bedka qaaradaha aduunka, Aasiya waxay ka tahay 30% (boqol kiiba 30). Dadka ama bulshada ku nool Aasiya waa 60% (boqolkiiba lixdan) marka loo fiirsho dad-weynaha ku nool adduunka. Sida dhabta ah Aasiya iyo yurub waa laba qaybood oo qaarad kaliya ah. Sabobo siyaasadeed iyo kuwo diimeed dartood ayey buuraha la dhaho Ural laba qaybood u qaybiyaan qaaradda eurasiske. Xadka ay qaaradda Afrika la leedahay wuxu gaaraa kanaalka suways ee dalka Masar.

Bay,adda iyo cimilada Aasiya waxa ay u dhaxaysaa qabowga deykaansan woqooyiga iyo kulaylaha kayn-roobeedka teedsn koonfurta qaaradda. Kunfur-galbeed qaaradda waxa teedsan saxara weyn. Diimaha waa wayn oo dhan waxa ay ka soo unkameen asal ahaan ka yimaadeen qaaradda Aaasiya. Diinta yuhuudda, kristanka iyo islaamka oo asal ahaan ka soo jeeda bariga dhexe iyo diinta hindida(hinduusam) iyo ta budiisamka oo ka soo jeedda bariga fog ee Aasiya.

Waxan si kooban u dhexmari doonnaa Shiina, Hindiya iyo Baakistaan oo ay ka soo jeedaan lab ka mida  dhaqamaddii waaweynaa ee ugu horeeyey ama ilbaxnimooyinkii ugu horeeyey, kumaankun sanno ka hor.

# Shiina




Illustrasjon av kart: Peter Hermes Furian/ AdobeStock

Shiinuhu waa dalka seddexaad ee u wayn dunida marka loo eego xagga bedka am inta uu dhul ku fadhiyo, waanada dalka ugu dadka badan aduunka. halkan waxa kale oo aan ka helaynaa ilbaxnimadii ugu da,da weynayd aduunka. Shiinaha wxa laga helayaa qoraalo taariikheed oo jira ilaa 3500 sanno, Wax soosaariddii ugu horaysay ee qoraalka, daabacadda,

lacgta warqadda ah, galaaska ama dhoobada iwm. waxa ugu horeeyey shiinaha.

Shiina wxa soo maray boqortooyooyin kala duwan, laga soo bilaabo boqortooyadii Shang ee 3500 sanno ka hor ilaa boqortooyaddii udanbaysay ee dhacday 1912 kii. Wakhtigaas oo ay shiina dagal kula jirtay Ingiriiska, Faransiiska, Jabaaniiska muddo ku dhow boqolsanno. Musuqmaasuq ballaaran oo ku fiday dalka iyo gaajo darteed ayaa sobobay in dalku kal furfurto, waxana shiiqisay danaha dalalka ajnabiga. Jammhuuriyadda shiinuhu waxay ay jirtaa ilaa 1949kii. mudaddii u dhaxaysay 1912 kii 1949 kii shiinaha waa la qabsaday, dagaal sokeeyana waa u uka dillaacay. Xisbiggii hanti wadaagga ayaa awoodda dalka la wareegay.

1949 kii uguna yeeray dalka Jamhuuriyadda Umadda ee Shiinaha. Waddaniyiintii la dagaalamayey hantiwadaagu, dalka waa ay ka baxsadeen waxan ay dageen jasiiradda Taiwan.

Tan iyo markaa dunidu si laba dawladood oo shiina ah ayey ula macaamishaa oo mid walba sheeganayo in uu matalo shiinaha oo dhan.

Shiinaha juquraafi ahaan waxa loo qaybiyaa seddex gobol.Koonfur galbeed waxa ku yaal Dhulka sare ee Tibetan, oo meesha ugu saraysaa ay badda ka sarayso 4900 mitir. Gobal adduunka ah oo ka sareeyaa ma jiro. Dhulka oo sareeya darteed cimiladu waa mid qabow, waxanay ku taalaa hoos-roobeedka buuraha dhaadheer ee Himalaya. Taasi waxay keentaa in dabaylaha maansuunku ee siiyaan roobabka badan dhulka buuraha Himalaaya kaxiga xagga koonfureed, aysan roob siin halkaan.

Xagga sare ee woqooyiga waxa ku yaalla ballacyada Tarim iyo Gobi oo meelo saxaro qabow ah. Waxay isku fidiyaan xadka xiga Afgaanistaan ilaa iyo bariga Mandsjuria. Meeshani waa meel qalalan oo qabow sidaa darteed waxba lagama beeri karo. Dad kala duwan oo riyaha dhaqda ama riyoolay ah ayaa halkaan ku dhaqda ariga iyo fardaha. Dhulka geeska bariga shiinaha ee banka wabiyada ku wareegsan wabiga Chang iyo wabiga Haung He waxa laga beeraa beero degdeg oo lagu waraabiyo waraabin macmal ah. Hareeraha wabiyadaan waaweyn waxa teedsan beero bariis ah oo kala sareeya ilaa dooxooyinka dhinacooda.

Xagga hoose koonfurta jawigeedu kulayle, waxana halkaan laga beeraa seddex dalag oo bariis ah. Waxa kale oo iyna halkaan laga beeraa, moos, iyo khudaarta meelaha kulul ka baxda.

Inkasta oo bulshada shiinaha badankoodu ka shaqaystaan beeraha hadan shiinuhu wax soosaar badan oo xagga warshadaha ah ayuu leeyahay. Waddanka shiinuhu waxa uu leeyahay khayraadyo dabiici ah sida dhuxul-dhagaxda iyo birta. Dalka shiinuhu waxa uu soosaaraa baatroolka, waana dalka labaad ee adduunka ugu isticmaalka badan baatroolaka. Tani waxay keentay in shuunuhu maanta la dhibaataysanyahay dhibaatooyin xagga jawiga iyo dabeecadda deegaanka ah. Khayraadka ugu muhiimsan  ee maanta shiinuhu haystaa waxa weeye shaqaale raqiis ah.

## Hindiya




Illustrasjon av kart: Peter Hermes Furian/ AdobeStock

Hindiya waa dal fadaraal ah waxana ay ka koobantahay 28 dowlad dagaan oo iskood isku xukuma, waana dalka labaad ee aduunka ugu dadka badan leh. Xagga bedka marka laga eego Hindiya waadalka todobaad ee ugu

bedka weyn adduunka kaa soo bedkiisu dhanyahay 3,2 milyan oo kiiloomitir laba jibaaran ah(2,3 milyan $km^2$). Labada wabi ee waaweyn ee Hindus iyo Ganga ayaa ah saldhigga ilbaxnimada hore ee dhaqmad heerka sare ah. Waqtiyaddi hore Waxa saamayn ku yeeshay india  carabta, turkiga iyo mangooliyiinta. Laga soo bilaabo sanadkii 1600 waxa ka samaysmay goobo ganacsi oo ay yurub leedahay, laga soo bilaabo 1805 tiina waxa xukumayey ingiriiska. India waxay heshay gobanimadeeda sanadkii 1947 dii, kadib markii muddo dheer u dagaalamayeen xornimadooda. Gobanima u dirirka ma uu hogaaminayn qok dagal wax ku doonayey, laakiin wuxuu ahaa nin aaminsanaa in dagaal la,aan lagu gaadhi karo gobanimada, waxaanu ahaa ninkii magaciisa la odhan jiray Mahatma Gandhi. Dhulka xagga woqooyiga xiga ee muslimiintu dagantahay isagu wuu ka g.ay Hindiya waxaanu noqday dal gooniya lana yidhaa baakistaan (Pakistan).

Hindiya waxay ay u qaybsantaa Juquraafi ahaan afar qaybood. Xagga woqooyiga sare waxa ku teedsan buuraha dhaadheer ee Himalaya. Koonfurta buuraha waxa iyana ku yaalla ballacyada wabaiyada woqooyi oo qallalan, una eg saxaraha baakistaana xagga galbeedka dhabarka kaga haysa. Dhulka bariga ee roobabku ku badanyihiin. Cherabunji oo koonfur ka xigta Brahmaputradalen waxa uu isgu helaa roobab sandkii gaadha 10800 oo miliimitir. Lakiin sanadkii 1960 waxa da,ay roob dhan 24470 miliimitir. Waa biyo buuxin kara garooka kubbadda cagta ee adduunka ugu weyn. Qaybaha dhexe ee Hindiya ee badweynta Hindia ku wareegsantahaywaxa ay ka koobantahay oogada Deccan ee xadka la leh

xeebaha galbeed ee buuraha galbeed Gats. Qaybta afraadna waa dhul hooseedka dhan ilaa 7000 km ee barbar dhaca xeebaha Hindia.

Marka laga tago buuraha Himalaaya waxa hindia saamayn weyn kuu leh dabaylaha maansuunka. Dabaylahaan  ayaa u sobob ah in dhulku kululaado, taasi oo keenta diirimaad iyo hawo cokan oo ka timaadda xagga badda waqtiga guga ah keentana roobab fara badan. Waqtiga jiilaalka dabaylo qabow oo qallan ayaa ka timaad bartamaha Aasiya iyada oo usocota xagga badda.

Hindiya waxa lagu qiyaasaa in ay tahay dalka afraad ee ugu dhaqaalaha badan adduunka. Hindiya waa dalka dhaaqilihiisu ugu koboca badnaa waqtiyadan danbe marka laga reebo shiinaha. Wax soosaarka beeruhu waa wadada ganacsi ee ugu muhiimsan. Beerista  miraha oo bariisku ugu muhiimsanyahay ayaa laga beeraa boqolkiiba shan iyo todobaatan (75%) dhulbeereedka. Hindiya waxa ay kale oo ay ka midtahay dalaka ugu soosaarka badan cudbiga iyo tubaakada ama buuriga.Wax soosaarka warshadaha ee dalka hindiya aad ayuu u kobcayaa maalinba maalinta ka danbaysa waxyaalaha ay soo saaraanna aadayey u tiro badanyihiin. Laakiin koboca dhaqaale dadka oo dhan ma wada gaaro. Dakhliga dadka soo galaana aad ayuu u kala fogyahay.

Hindidu waxa ay leedahay wax soosaarka ugu weyn ee xagga filimada. In kabadan kumanaan film oo kala duwan ayey samaysaa wakaaladda filimada hindida ee la yiraahdo Bollywood. Magacu wuxu ka soo jeedaa laba erey ee Bombay iyo Hollywood.

Taaj Mahaal Waa dhisme taariikhi ah oo ku yaal magaalada Agra ee woqooyiga India. Waxa la dhisay intii u dhaxaysay 1632 dii ilaa 1653. Waxa dhisay Shaah Jahan oo u dhiisay si xasuus ahaana xaaskiisii uu ugu jeclaa oo dhimatay iyada oo 39 sano jir ah sanadkii 1631 dii, waxay dhimatay markay dhashay gabadhii ugu yarayd ilmaha ay u dhashay oo tiradoodu dhantahay 15 caruura.

## Baakistan




Illustrasjon av kart: Peter Hermes Furian/ AdobeStock

Intii ka horaysay 14 kii bisha agoosto 1947 dii waxay Baakistaan taariikhdeeda cusub la wadaagaysay dalka India. Kadib markii boqortooyada Ingiriisku qabsatay inta u badan dalka Baakistaan bartamihii 1800 kii labada dalba si isku mid ah ayaa loo xukumayey meella waa laga wada xukumayey waxana loogu yeeri jiray magaca ah Hindiyadii Ingiriiska(Britisk India). Markii uu Ingriisku ka kacayey ee uu gobanimada siina yey India ayey Muslimiintu codsadeen ina ay gooni isku taagaan oo ay dal gooniya noqdaan. Sanadkii 1947 markii Hindia gobanimada qaadatay ayaa la sameeyey dalka Baakistaana oo ka kooban laba qaybood oo kala ah Galbeedka Baakistaan iyo Bariga Baakistaan. 1971 ayay qaybtii bari ee Baakistaan ka g,day Baakistaan lana baxday Bangaladheesh.

Taariikhda siyaasadeed ee Baakistaan waxa isku badbadalayey xukuumado baarlamaani dimuqraadi ah iyo kuwo diktaatoori milatari ah. Xukunkii kaligiitaliska milatari ee ugu danbeeyey waxa xukumayey Janaraal Musharaf. Benazir Bhutto oo dalka hore uga noqotay ra,iisul barlamaan waxa lagu dilay qarax argagisisnimo.

Sanadkii 2007 dii. Baakistaan xagga bari wax aka xiga dalka Hindia. Gobolada bari ee Punjab iyo Sindh waxay lee yihiin cimilo aad uqalalan. Halan waxa waran saxaraha la yiraahdo Saxaraha-Thar ay Hindiyana ugu yeerto Cholistan. Qaybo badan saxaraha ka mid ahi waa dhul dihin ama la beeran karo, sobobtoo ah wax dhex qulqula biyo ku yimid waraabinta aan dabiiciga ahayn ama soo mara kanaalo oo laga keenay webiga Indus. Waa kanaalada ugu waaweyn adduunka ee noocaan ah. Halkan waxa laga beeraa qamadi fara badan, bariis, cudbi iyo qasab ama aale sonkor. Gobolka xagga galbeed ee magaciisa la yiraahdo , Balutsjistan, ee la

leeyahay Iraan iyo Afgaanistaan waa buuralay qalalan. Xagga woqooyigacimiladu waa cokantahay waxana ku yaal kaymo dhaadheer oo cokan.

Xagga ugu saraysa ee woqooyiga Baakistaan waxa ku yaal gobolka Kaashmiir ee mar walba muranku ka taaganyahay ee sobobtay in labadan dal tiraba seddex mar ku dagaalamaan. Qaybt Kaashmiir ee Baakistaan xukunto qaybta shiinaha xigta waxa teedsan buuro dhaadheer oo ka mid tahay K2 oo buurta labaad adduunka ugu dheer.

Kala bar bulshadu waxa ay ka shaqaysataa waxsoosaarka beeraha oo kala ah suuf, bariis, waxyaalaha la harqaamo iyo qadiifado ama roogag oo ay u dhoofiyaan dibadda. waxyaalaha dharka laga sameeyaan dhaqaalaha dalka wax weyn ayuu soo galyaa. Magaalooyinka Lhore iyo Karachi ayaa santar u ah warshadaha ganacsiga.

## Su,aalo:

1. Dalka Shiinaha qaybtee ayaa u qabow?
2. Maxaa la yiraa gobolka Hindiya iyo Baakistaan had iyo jeer ku murmaan?
3. Diimahee ayaa lagaga dhaqmaa Hindiya iyo Baakistaan?
4. Xidhiidh noocee ah ayaa ka dhexeeya roobabka ka da,a woqooyiga Hindiya iyo cimilada qalalan ee Tibet.
5. Waayo Ingiriisidu u ahayd luqadda rasmiga ah ee Hindiya lagaga hadlo.